

Barnaamijka Diiwaangalinta Rafiiqa Guriga Magaalada Seattle

Tan iyo 1994, Magaalada Seattle waxay lammaanaha aan isqabin ee xidhiidh muddo dheer leh lahaa ayaa waxay u fidineysey fursad ah inay ku dokument gareeyaan xidhiidhkaan iyagoo ka diiwaangalinaya rafiiq guri Xafiiska Karraaniga Magaalada Seattle. Diiwaangalinta Rafiiqa Guriga waa mid iskaa wax-u-qabsi ah, oo mana abuurayo xuquuq ama masuuliyado dhanka sharciga oo cusub, ama waajibaadyo heshiis ama maaliyadeed oo dhexmara kuwa is-diiwaangaliyey.

Waa kuma qofka Isku Diiwaangalin Kara Rafiiq Guri Magaalada Seattle

Marka la eego Sharciga Magaalada Seattle ([Ordinance 117244](#)), Rafiiqyada Guriga waxa lagu qeexaa laba qof oo kasta oo:

- Labadooduba ah 18 sano jir ama kawayn;
- Aynan isqabin cid kale;
- Aynan midba midka kale wadaagin dhiig eeqaab uu guurkooda oo uu Gobolka Washington mamnuucayo;
- Leh xidhiidh is-taageerid, naxariis, iyo ka go'naan; iyo
- Aannan lahayn rafiiq guri oo kale.

Barnaamijka Diiwaangalinta Rafiiqa Guriga uma baahna deggenaansho Seattle; wuxuu u furan yahay dhammaan shaqsi kasta oo raba inuu kaqaybqaato.

Barnaamijka Diiwaangalinta Rafiiqa Guriga lama mid aha Barnaamijka Rafiiqa Guriga Gobolka Washinton

Gobolka Washington wuxuu maamulaa barnaamijkiisa u gaarka ah ee diiwaangalinta rafiiqyada guriga, oo uu oggolaaday Cutubka 156, Shuruuciyada 2007. Shuruudaha iyo manfacyada waa **ka duwan yihiin** barnaamijka Magaalada Seattle:

Magaalada Seattle	Gobolka Washington*
Shardi da'eed ma jiro	Shardi da'eed ma jiro lammaanaha isku-jinsiga ah; lammaanaha kala-jinsiga ah, hal rafiiq waa inuu noqdaa 62 ama kawayn
Kaqaybqaatayaashu Shahaado Diiwaangalin ayaa la siinayaa	Kaqaybqaatayaashu shahaadooyin iyo kaadhahka boorsada (wallet cards) ayaa la siinayaa
Wax xuquuq ama manfacyo cusub oo sharci ah lama abuurayo	Kaqaybqaatayaashu waxay leeyihiin xuquuq sharci oo ay kujiraan booqashada isbitaalka, go'aan ka qaadashada daryeelka caafimaad iyo waxyaalo kale
Khidmadda diiwaangalinta \$25	Khidmadda diiwaangalinta \$50

Barnaamijka Rafiiqa Guriga ee Gobolka Washington waxaa maamula Xoghayaha Gobolka (Secretary of State) (Qaybta Shirkaddaaha (Corporations Division)); macluumaad badan oo kusaabsan barnaamijkaas waxa laga heli karaa 360-725-0377, iyadoo iimayl loo diro corps@sos.wa.gov, ama boggooda internetka:

<http://sos.wa.gov/corps/domesticpartnerships/>

*Meelaha qaar kamida Barnaamijka Rafiiqa Guriga Gobolka Washington way isbeddeli karaan marka shuruudaha SB 6239, ee la ansixiyey bisha Fibraayo 2012, ay dhaqangalaan.

Kahor inta aaddan iska diiwaangelin barnaamijyadan midkooda, fadlan ka fikir si aad u go'aamiso barnaamijka baahidaada buuxinaya.

Sida la Isaga Diiwaangaliyo Rafiiqa Guriga ee Magaalada Seattle

- Soo guuri Foomka Diiwaangalinta Rafiiqa Guriga ([Domestic Partnership Registration Form](#)), ama nuqul ka codso Xafiiska Karraaniga Magaalada;
- Buuxi foomka (fadlan u qor far la akhrin karo);
- Labada rafiiq waa inay saxeexaan foomka oo saxeexyadana waa in notaayo loo geeyaa;

- U keen ama boosto ku dir foomka iyadoo ay la socoto \$25 oo ah khidmadda u dir Xafiiska Karraaniga Magaalada.

Macluumaadka kale ee Muhiimka ah

- Khidmadaha Barnaamijka:
 - Khidmadda diiwaangalinta: \$25
 - Khidmadda beddelidda shahaadada: \$10
- Si aad u hesho macluumaad badan ka eeg Jadwalka Khidmadda ([Fee Schedule](#)) ee Xafiiska Karraaniga Magaalada.
- Noocyada lacag Qabashada:
 - Jeeg
 - Lacag dalab (money order)
 - Naqdi – qofku sito oo kaliya; fadlan lacag naqdi ah boostada ha ku soo dirin
- Shahaada Diiwaangalinta codsiyaasha sida caadiga ah waxaa loogu diraa saddex maalmood gudahooda laga bilaabo marka codsiga la helo. Shahaadooyinka waxa lagu diraa Adeegga Boostada Maraykanka Dabaqadda Koowaad.
- Shahaadooyinka waxa lagu bixin qofka oo jooga; fadlan sii wac si aad ballan u qabsato adeeggan.
- Diiwaangalinta Rafiiqa Gurigu qarsoodi ma ah. Waa diiwaan dadwayne marka la eego Xeerka Dib loo eegay ee Washington (RCW) Qaybta 42.56.

Rafiiqa Guriga iyo Shaqaalaha Magaalada Seattle

Waa sharciga Magaalada Seattle in loo aqoonsado sharci, guurka dadka isku-jinsiga ah inuu la mid yahay ka dadka kala-jinsiga ah. (Eeg Amarka Madaxa Sare ([Executive Order 02-04](#).) Guurka dad isku-jinsi ah oo sharci ahaan jiraa waa ka ka diiwaangashan gobol ama waddan laga oggol yahay guurka dadka isku-jinsiga ah.

Si aad u hesho foomka Rafiiqa Guriga Magaaladu Oggolaatay (eeg Qaybta SMC [4.30.010](#)), fadlan la xiriir wakiilkaaga shaqsiga.

Haddii uu Dhammaado Rafiiq Guri oo Diiwaangashan

- Si aad u soo afjarto diiwaangashanaanta rafiiqa guriga, buuxi foomka Joojinta Rafiiqa Guriga ([Domestic Partnership Termination Form](#)) una dir Xafiiska Karraaniga Magaalada.
- Kaliya hal rafiiq ayaa loo baahan yahay inuu saxiixo foomka; saxiixa waa in nootaayo loo geeyaa.
- Warqad xaqiijin ayaa loo diri rafiiqa codsanaya.